

# Warbixin ay sabab u tahay faayraska karoona, covid 19

**Degmada Linköping waxay la soconaysaa isbadalada dhanka faayraska karoona ee cusub waxaanay si fir-fircooni uga shaqaynaysaa in hawlaho degmada ay sida ugu yar ee suurtagal ah raad ugu yeelan lahaa faafintan gudaha Linköping.**

Degmada Linköping waxay la soconaysaa isbadalada dhacdooyinka, xiriir la leedahay hey'addaha dawladeed ee mas'uulka ah lana soconaysaa qiimeyntooda iyo talo-bixintooda. Maamulada degmada si joogto ah ayaa loogu wargelinayaa wixi ku saabsan xaalada.

Degmada Linköping waxay abuurtay xitaa hogaan si loo maareeyo faafinta cudur ee Linköpinng iyo si hawalaho degmada ay sida ugu yar ee suurtagal ah raad ugu yeelanto.

## 113 13 ayaa ka jawaabaya su'aalahaaga

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan covid-19 waxaad wici kartaa lambarka macluumaadka qaranka ee 113 13. Dhamaan macluumaadka ay bixiso 113 13 waa kuwa ay xaqijiisay Hey'adda arrimaha caafimaadka ama hey'ad dawladeed oo kale oo mas'uul ah. Adeegan waxaa la helayaa maalintii iyo habeenkiiba. Wixi dheeraad ah waxaad ka akhrin kartaa <https://www.krisinformation.se/>.

## Goorma ayay tahay inaad la xiriirto daryeelka caafimaadka?

Dadka badankooda uu ku dhaco covid-19 si xun uma xanuuusadaan oo ma u baahna inay la xiriiraan daryeelka caafimaadka. La xiriir daryeelka caafimaadka haddii aad dareemayso xanuun aad u xun. Markaasi waa inaad wacdo telafoon lambarka 1177. Haddii ay aad kuugu adagtahay inaad neefsato, wac 112.

Wixi dheeraad ah ee ku saabsan covid-19 iyo is-badalada kala soco bogga intarnatka ee Hey'adda arrimaha caafimaadka:

<https://www.folkhalsomyndigheten.se/>